



# OGAYSIIS MUHIIM AH OO KU SAABSAN CAABUQA KORONAFAYRAS(COVID-19) OO LOOGU TALO GALAY DHAMMAAN QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO-DOONKA KU NOOL NAWAAXIGA MAGAALOOYINKA

15-ka Maarso 2020, Dowladda Kenya waxay ku dhawaaqday tallaabooyin gaar ah oo looga hortagayyo faafida Caabuqa Koronafayras(COVID-19). Laga bilaabo, 27-ka Maarso 2020-ka, **waxaa jira bandow inta u dhaxaysa 7-da fiidnimo illaa 5-ta aroornimo**. Lama ogola inaad ka baxdaan guryihiinna inta lagu jiro wakhtigaan, haddii kale waa la idin xirayaa.

Inta lagu jiro saacadaha kale, fadlan haku warwareegin meelaha si micno darro ah. Haddii aad ku khasban tahay inaad socoto, waa inaad sidataa warqadahaaga rasmiga ah. Haddii lagugu xiro saldhigga booliska, fadlan sheeg magacaaga saxda ah, dhalashadaada iyo aqoonsigaaga diiwaangelinta.

## Lambarrada Gargaarka Degdegga ah

- **Diiwaangelinta / xaaladaha degdegga ee warqad-siinta:**  
Xoghaynta Arrimaha Qaxootiga Shauri Moyo: 0772057770
- **Khadka Caawinta ee UNHCR:** 0800720063 (bilaash ah)
- **Xaaladaha degdegga ee Caafimaad:**  
NCKK 0704873342 / 0723281362
- **Xaaladaha degdegga ee la xiriirta sharciga (sida xiritaan, dhibaatayn boolis):** Kituo cha Sheria 0721991736
- **Xaaladaha degdegga ee maciishada:**  
Danish Refugee Council 0800720181
- **Arrimaha la xiriira Caymiska NHIF (Sanduuqa Caymiska ee Isbitaalaadka Qaranka):** 0740049502

Haddii aad leedahay mid ka mid ah calaamadaha Caabuqa Koronafayras (**COVID-19**) sida qandho, qufac, neef-tuur iyo neefsashada oo kugu adkaata, **fadlan kala xiriir Wasaaradda Caafimaadka halkaan** 0800721316 (bilaasha ah); 0732353535; ama 0748592558 si lagu hago.